TILMAAMAHA DIWAANGELINTA CASHUURBIXIYAHA

Tilmaamahan iyo Foomka la socda waxaa bixiya Waaxda Cashuuraha Berriga

Innaga oo u hoggaansamayna qodobada No. 20,36,158,169,175 ee xeerka cashuurta dakhliga ee 72/2016 iyo digreetooyinka/wareegtooyinka wasiirrada ee qeexaya qaabka loo isticmaalayo noocayadda cashuurta dakhliga ee kor xusan, dhammaan ganacsiyada iyo loo shaqeeyayaasha waxa looga baahan yahay in ay yeeshaan lambarka aqoonsiga cashuur-bixiyaha(TIN).

Dhaman dadka cashuurtuu ku wajibtey waxa looga bahan yahay inay iska diwaangeliyan waaxda cashuuraha berriga. Foomka waxaa loo isticmaalayaa in lagu diiwaan-geliyo dadka cashuurtu ku waajibtay ee ka hawl gala somaliland. Waxa ku jira hayadaha looga baahan yahay in ay ka reebaan cashuurta dakhliga ee qofka ku wajibtay mushaharka ay siiyaan shaqaalahooda.

Waxaana isticmaalayaa, ganacsiga shakhsi kaliya ah iyo kuwa aan shakhsiga ahayn labadaba (individual and Non-individual businesses). Kuwa shakhsi kaliya ah waxaa loola jeeda ganacsiga qof kaliya leeyahay, halka kuwa aan shakhsiga ah loola jeedo kuwa ay wada leeyihiin dad badani sida shirkadaha hantidu gaarka ugu suntantahay ee leh magac qaynuuni/sharci ah (Private Limited CO.), kuwa dad koobani leeyihiin, iskaashatooyinka, ururada, qeybaha dawliga ah, haya'daha aan dawliga ahayn, mashaariic xafiiseedyadda, haya'daha caalamiga ah, iyo kuwa la mid ka ah ee aan shakhsiga ahayn ee ay cashuurtu ku waajibtay.

Waxa lagaaga baahan yahay in aad diiwaangeliso nooc kasta oo ganacsi ka hor inta aanad bilaabin, adiga oo codsanaya shahaadada diwaangalinta cashuurta (Tax registration Certificate). Codsashada shahaadada cashuurtu waa bilaash. Lambarka Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha (TIN) waxa lagu bixinayaa xafiiska diiwaangalinta ee waaxda cashuuraha berriga ee magaalada Hargeysa ama ba xafiiska ay gobolada ku leeyihiin ka ugu dhaw.

Hadii aan macluumaad sax ah la helin, diiwaan-gelintu way dib-dhacaysaa ama waxaad waajihi doontaa dib u dhac ku yimaada helida Shahaadada aqoonsiga cashuurbixiyaha (TIN) iyo adeegyada kaleba. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan la xidhiidh xarunta xafiiska diiwaan-gelinta (Taleefanka) .... Ama booqo xafiiska kuugu dhow ee degmadaada.

Haddii aad u baahato dib u habayn ama wax ka badal ku saabsan warbixinta ganacsigaaga, waxa aad isticmaashaa foomka dib-u-habaynta diiwaangalinta cashuur-bixiyaha (Registration Modification Form TPRMF03) ee laga helayo mareegta (website-ka) wasaaradda maaliyadda amaba xafiisyada cashuuraha berriga ka kuugu dhaw.

Waxa aad foomkan ka helaysaa meelo loogu talo galay in aad buuxiso. Waxa aad si fiican u hubisaa khaanadaha iyo shaxaha ku habboon noocaaga ganacsi. Sida oo kale waxa aad si qoto dheer u tibaaxdaa hawlgalladaada la xidhiidha ganacsigaaga.

1. Ganacsiga Shakhsiga ah : wuxuu sida ugu habboon u buuxinayaa Qaybta A1 iyo A2 iyo dhammaan Qaybta B.

2. Kuwa aan Shakhsiga ahayn : wuxuu si ugu habboon u buuxinaya Qaybta A1 iyo A3 iyo dhammaan Qaybaha B.

Buuxi dhammaan qaybaha iyo qayb-hoosaadyada foomkan sida looga baahan yahay [(*) calaamadan oo Ina tusaysaa qaybaha aan laga tagi karink)] ka bacdina FAR WAAWEYN KU QOR, Saxeexna cadaynta xaga hoose (Qeybta C) oo ku soo celi waaxda Cashuuraha Berriga ”WCB” ama xafiiska dakhli ururinta ee degmeda.

Foomkan diiwangalintu waxa uu ka koobanyahay afar qaybood:

QAYBTA A – Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha

A1 – Faahfaahinta Guud: Waa xogta la xidhiidha ganacsiga shakhsiga ah iyo ganacsiga aan shakhsi ahayn. Inta badan tani waa xaaladda sharci ee shakhsiga iyo noocyada shakhsiga qaynuuniga ah.

A2 – Faahfaahinta shakhsiga caadiga ah (Physical Person) – Qor xogta la diiwaangaliyaha: magaca, jinsiga, iwm. Haddii aad shakhsi tahay, waxa aad hubisaa in aad si sax ah u qortay magacaaga oo saddexan.

A3 – Faahfaahinta shakhsiga Qaynuuniga ah: Qor xogta cashuurbixiyaha loo diiwaangaliyay shakhsi qaynuuni ah magaciisa, sharciyadda lagu aasaasay. Sida oo kale, waxa aad qortaa magaca, nooca shirkada, magaca ganacsi iwm. Qor magaca sharciga ah ee lagu diiwaan galiyay ganacsiga.

QAYBTA B – hawlaha la xidhiidha qaybaha ay wadaagaan ganacsiga shakhsiga ah iyo ka aan shakhsiga ahayn

B1 – Faahfaahinta xogta ganacsiga: nooca ganacsi, xisaabta bangiga, nooca nidaam-xisaabeedka, ilaha dhakhliga iwm. Haddii uu ganacsigaagu leeyahay magac ka duwan magacaaga, waxa aad galisa magacaas halka loogu talo galay. Waxa aad sheegta qiyaasta wax iibsiga sanadlaha ganacsigaaga. Sida oo kale, waxa aad sheegta tirada shaqaalahaaga (rasmi iyo ku-meel-gaadh) kaas oo ay hayadaada/ganacsigaagu shaqaalaysiiyay sanadka gudihisa.

B2- Ciwaanka xafiiska la diiwaan galiyay: waa goobta waraaqaha loogu diri doono cashuur bixiyaha. Waxa loo baahanyahay ciwaanka goobta xafiiska ee ganacsigaaga.

B3 – **Hawlaha ganacsi**- waxa jirta qayb loogu talo galay in uu cashuur bixiyuhu ku buuxiyo qaybtiisa ganacsi.

B4- Bangiyada uu ganacsigu isticmaalo: halkan waxa looga bahanyahay xogta account-yada aad ku leedahay bangiyada

B5 – Laamaha Ganacsigaaga: magacyadooda, ciwaanadooda ay ku leeyihiin goobaha kale.

B6 – Ganacsiyada kale: Waxa jiri karta ganacsiyo kale oo aad dakhli ka hesho. Waxa ay noqon karaan dalka gudihiisa ama dalka dibadiisa.

B7 - Noocyada cashuuraha la bixiyo: Cashuuraha ku waajibay qofka ee ku salaysan nooca ganacsi ee uu leeyahay.

Hadi codsaduhu u yahay iskashato ama ganacsi dad kooban leeyahay, waxa la qoraya dhaman magacyada samilayda iyo qaybaha shurakada.

Qor magaca iyo xogta qofka waaxda cashuuraha berrigu kala xidhidhi doono ganacsigaga ama arrimaha khuseya cashuuraha.

QAYBT C – CADDAYN

“Waxa aan halkan ku caddaynayaa in ay xaqiiq tahay xogta aan foomkan ku qoray.” Caddayntani waxa ay muujinaysaa in uu cashuur bixiyuhu dhammaystiray foomkan.

Fadlan, waxa aad hubisaa in uu saxeexay qofka awoodda u leh. Qofka awoodda u leh waxa uu noqon karaa mulkiile, shuraako, ama qofka ay shirkaddu u xil saaratay haddii uu codsaduhu yahay shirkad ama iskaashato ganacsi

QAYBTA D – Goobta loogu talo galay in ay buuxiyaan Maamulka Cashuurha Berrigu

- Hubi abla-ablaynta (kala soocista) Cashuur bixiyayaasha
- Hubi xarunta cashuurta (Xafiiska Cashuurta)
- Ku qor Lambarka Aqoonsiga Cashuurbixiyaha (TIN) ee loo qoondeeyay

Hubi in uu dhokumentiyada uu cashuurbixiyuhu ku lifaaqay foomka diiwaan galinta, ka dibna waxa aad galisa faylkiisa u gaarka ah.